GOBOLKA VERMONT

MAXKAMADA SARE **WAAXDA QOYSKA**
Qayb **Lambarka Diiwaanka**

Jawaab:	Taariikhda Dhalashada:

HESHIISKA XIDHIIDHKA AMA XIDHIIDHKA GO'AANKA KORSASHADA KADIB

Heshiiskan waxaa geley dadka soo socda:

Waalid(iinta): _____

Waalid(iinta) Korsashada ee Loo Ogolaaday: _____

Heshiiskan waxa uu ku saabsan yahay kulan ama xidhiidh ka dhexeeya ama ku saabsan _____
(Ilmaha Magaciisa)

iyo waalid(iinta) kor ku qoran kadib marka ilmaha loo ansixiyo korsashada waalidka korsanaya ee loo ogolaaday.

Heshiiskan waxa ogol sharciga Vermont, Cinwaanka 33, Qaybta 5124.

Waalid kasta iyo waalid kasta oo korsanaya oo loo ogolaaday waxa uu fahmay oo uu ogolaaday waxyaabaha soo socda:

A. Heshiiskan waa Ikhtiyaar oo Waana Sharci

1. Waxa aan ku geley heshiiskan xidhiidhka ama kulanka ikhtiyaar. Cidna igumay khasbin inaad galo heshiiskan.
2. Waxa aan doonayaa inaan raaco heshiiskan.
3. Waxa aan fahansanahay in heshiiskan uu sharci yahay ay dhaqan gelinayso Maxkamada Sharciga ahi.
4. Qaabka xidhiidhka ama kulamada lagu heshiiyay waxay ku lifaaqan tahay faahfaahintoodu waraaqahan.

B. Mudada iyo Wax Ku Oolnimada Heshiiska

1. Heshiiskan waxaa uu dhaqan geli doonaa kaliya kadib marka ay **dhamaan** ay dhacaan waxyaabaha soo socdaayi:
   a. Waalidku uu u saxeexo heshiiskan si ikhtiyaar ah oo uu xuquuqda waalidnimo ee ilmaha iskaga wareejiyo;
   b. Xaakinka Maxkamada Qoysku uu ogolaado in heshiiskan ay dan ugu jirto ilmaha oo waxa uu ku ansixiyo heshiiskan amar Maxkamada ah; iyo
   c. Ilmaha ay si sharci ah ugula wareegaan korsashadiisa Vermont waalidka korsanaya ee saxeexay heshiiskan.
2. Heshiiskan waxa uu jiri doonaa ilaa munaasabadda maalinta dhalashada 18 aad ee ilmaha. Wixii intaa ka danbeeya ma shaqaynayo hadii meesha ay ka baxdo korsashadu (hadii ilmaha aanay gacanta ku haynin waalidka korsanayaayi).

C. Amarka Xaakinka ee Meesha Ka Saarida Xuquuqda Waalidnimo Ayaa Kama Danbays ah

1. Waxa aan fahansanahay in meesha ka saarida xuquuqda waalidnimo in aan dib looga noqon karin oo uu rasmi ahaanayo, xataa hadii korsashada la ogolaaday ayna dhicin, ama waalid(iinta) korsanayaa aanay raacin shuruudaha heshiiskan, ama korsashadu ay marka danbe meesha ka baxdo.

D. Badalida ama Dhaqan Gelinta Heshiiska

1. Kadib marka ay Maxkamadu ansixiso heshiiskan waalidka hore iyo waalidka korsanaya ayaa ku wada heshiin kara inay wax ka badalaan shuruudaha xidhiidhka laakiin wax ka badalkaan Maxkamadu ma sharciyayn doonto. Waalidka hore waxa ay dalban karaan in la sharciyeeyo shuruudaha heshiiskan laakiin kama dalban karaan Maxkamada inay wax ka badasho shuruudaha heshiiskan.

2. Kahor inta waalidka korsanaya ayna dalban wax ka badal heshiiskan ah ama kahor inta aanu dhinacna ka dalban Maxkamada inay sharciyayso heshiiskan, dhinacyada heshiiskani waa inay ka qayb galaan madal dhex dhexaadin ah ama nidaam kale oo muranka lagu xalinayo oo ay doortaan. Hadii lagu guulaysan waayo dadaalladaas, dhinac waa inuu la xidhiidhkaa Maxkamada Sharciga ee maamusha dacwadaha noocan oo kale ah. (Hadii goobta Maxkamada Sharciga ah aan la garanaynin, Duwaanka Korsashada Vermont ayaa bixin kara macluumaadkaas.)
3. Hadii Maxkamada Sharciga laga dalbado inay sharciyayso ama badasho heshiiska, Maxkamadu waxay eegi doontaa wixii dan u ah ilmaha.

E. Xuquuqda Waalidiinta

1. Waalidiinta hore waxa ay ka dalban karaan Maxkamada Sharciga ah inay dhaqan geliso shuruudaha heshiiskan hadii waalidiinta korsanayaa aanay dhaqan gelin heshiiska. Masuuliyada waxaa iska leh waalidka hore inay cadeeyaan in dhaqan gelintaas ay dan ugu jirto ilmaha.
2. Heshiiskani kama xadido waalidka inay u guuraan magaalo, gobol ama dal kale.

F. Xuquuqda Waalidka Korsanaya

1. Waalidka korsanaya waxa ay ka dalban karaan Maxkamada Sharciga ah inay badasho ama meesha ka saarto heshiiskan hadii ay u arkaan in sidaas ay dan ugu jirto ilmaha. Masuuliyadu waxay saaran tahay waalidiinta korsanaya inay cadeeyaan in tan dan ugu jirto ilmaha.
2. Haddii heshiiska uu kamid ah qorshaha booqashooyinka, waalidiinta korsanayaa waxay meesha ka saari karaan booqashada hadii ilmuhu uu xanuunsanayo, ama hadii ay jiraan sababo wanaagsan oo ay u joojinayaani. Hadii waalidka hore la ogaado inuu soo sakhraamay ama uu mukhaadaraad soo adeegsaday, waalidka korsanaya ilmaha ayaa u diidi kara booqashada. Dhinacyada ayaa qiray in go'aanka waalidka korsanaya ee la xidhiidha ilmuhu uu dan u yahay ilmaha.
3. Heshiiskani kama xadido waalidiinta korsanaya inay u guuraan magaalo, gobol ama dal kale.

G. Shuruudaha Xidhiidhka Korsashada Kadib

Waalidiinta dhalay ilmaha iyo waalidiinta korsashada loo ogolaaday waxay ku heshiiyeen noocyada soo socda ee xidhiidhka ama kulanka. Fadlan cadeeya inta jeer ee la kulmayo (goorta iyo meesha; saacadda maalintii, xadidaadda ku saabsan saacadda maalintii), cida lala kulmayo, iyo cidda kale ee joogaysa goobta kulanka marka laga tago ilmaha.

Xidhiidhka qoraalka ah ee iimeelka ama boosta ah. (Waajibaadka diritaanka shayadu waa uu joogsanayaa haddii dhinacyadu ayna isa siin cinwaanka saxda ah.)

☐ Ma khuseeyo
☐ Wuu khuseeyaa si faahfaahsanna waa loo sharxay:

_____
_____
_____
_____
_____

Xidhiidhka qoran ee Duwaanka Korsashada Vermont. Hadii tani ay tahay qorshaha, waalidka dhalay ilmaha iyo waalidka korsanaya ayaa la socod siin doona Duwaanka Korsashada Vermont wixii isbadal ah ee cinwaanka ah. (Waajibaadka dirista shayadu waa uu joogsanayaa hadii waalidiintu aanay siinin cinwaan wakhtigan ah Duwaanka Korsashada Vermont.)

☐ Ma khuseeyo
☐ Wuu khuseeyaa si faahfaahsanna waa loo sharxay:

_____
_____
_____
_____
_____

Foomka Bixinta DCF ee Macluumaadka Aqoonsiga waxaa lasiin doonaa Duwaanka Korsashada.

Xidhiidhka taleefanka (waxaa ku jira qoraal)

- ☐ Ma khuseeyo
- ☐ Wuu khuseeyaa si faahfaahsanna waa loo sharxay:

Kulanka foolka-foolka ah (waxaa ku jira cid kale ee ku joogi doonta ama ay dhici karto inay joogto; ayo, halkee, goorma, sidee)

- ☐ Ma khuseeyo
- ☐ Wuu khuseeyaa si faahfaahsanna waa loo sharxay:

Xidhiidhka kale (waxaa kamid dhamaan noocyada elektarooniga/xidhiidhka aalada taleefanka, oo ay kamid yihiin laakiin aan xadidnayn, baraha bulshada)

- ☐ Ma khuseeyo
- ☐ Wuu khuseeyaa si faahfaahsanna waa loo sharxay:

Xidhiidhka kale (sii socod)

- ☐ Kulamada soo socda si gaar ah looma ogola:

Aniga/Anaka waxa aanu galnay heshiiskan anaka oo og oo ikhtiyaar kaayagana ku galnay. Heshiiskan waxaa la saxeexay iyada oo xor la yahay oo la doonayo, oo kuma uu iman khasbid, khiyaano ama handadaad. Aniga/Anaku kuma tiirsanin matalaad aan ahayn kuwa ku jira heshiiskan.

Taariikhda

_____ _____

Waalidka Ilmaha
□ Waxa aan fursad u heley aan kagala hadlo looyarkayga.

Taariikhda

_____ _____

Waalidka Ilmaha
□ Waxa aan fursad u heley aan kagala hadlo looyarkayga.

Taariikhda

_____ _____

Waalidka Korsashada Loo Ogolaaday

Taariikhda

_____ _____

Waalidka Korsashada Loo Ogolaaday

Ku saxeexay oo ku dhaartay hortayda:

Taariikhda	*Saxeexa Sarkaalka Nootaayada Dadweynaha*	*Taariikhda Dhicitaanka*

Ku saxeexay oo ku dhaartay hortayda:

Taariikhda	*Saxeexa Sarkaalka Nootaayada Dadweynaha*	*Taariikhda Dhicitaanka*

Waxa aan ogolaaday kulanka ama xidhiidhka korsashada kadib ee kor lagu sheegey.

Taariikhda

_____ _____

Saxeexa Shaqaalaha Bulshada DCF

Taariikhda

_____ _____

Saxeexa Koriyaha Matalaya

Taariikhda

_____ _____

Saxeexa Looyarka Ilmaha

Hadii ilmuhu uu yahay 14 sano jir ama kawayn yahay:

Aniga oo ah,_____, waxa aan ogolaaday kulanka ama xidhiidhka korsashada kadib ee kor lagu sheegey.
(Magaca Ilmaha)

Taariikhda

_____ _____

Saxeexa Ilmaha